# ANIGU WAXAAN XAQ U LEEYAHAY

ANIGA IYO REERKEYGA\FAMILKEYGA

| | |
|---|---|
| **Anigu xaq waxaan u leeyahay in aan xaqiijiyo masawir ama warqad aqoonsi (dukuminti)** | **Waxyaabaha la xiriira fulinta arimaha xafiisyada waxaa sharcigu dhigayaa in la xaqiijiyo masawirkaaga in uu runtii masawikaaga yahay (tusaale ahaan warqada dhalashada oo masawirkaaga iyo magacaagaba ku yaalaan);markaanookale waxaad aadi kartaa adiga naftaada adigoo sita warqadaada aqoonsiga oo aan dhicin iyo masawirkaaga (carta di identità permesso soggiorno).xafiiska layiraa nootaayo ama kumuunaha:markaas nootayaha ama qofka ofishalka ah ee kumuunuhu u magacaabay howshaan waxa ay isku xirayaan oo is waafajinayaan masawirka iyo warqad qoran oo cadeyn ah ayagoo ku cadeynayain masawirku uu yahay wajigaaga oo la raacinayo kuli macluumaadkaaga sida magacaaga,goortaad dhalatay I.W.M.** |
| **anigu xaq waxaan u leeyahay in aan iska diiwaan geliyo ragistarka tira koobka degmada aan deganahay ama ku noolahay/kumuunaha** | waxaad kale oo aaad xaq u yeelaneysaa in lagaa caawiyo waxyaabaha qaar sida nolosha bulshada iyo caafimaadka iskana diiwaan gelin kartaa sistemka cafimaadka wadanka,waxaad weydiisan kartaa guri kaasa – balbalaare,waxaad geli kartaa imtixaanka kuu ogolaanayo in aad baabuur wadi karto oo waxaad qaadaneysaa hadii aad ku gudubto (batantaha),waxaad kale oo aad badalan kartaa hadii aad batante horay uga soo qaadatay wadankaaga waxaana laguugu badalayaa midka talyaaniga. |
| **Anigu waxaan xaq u leeyahay in aan weydiisto/helo warqad ogolaasho ah oo ii saamaxaysa in aanguursado\guursan karo** | Hayada qaxootiga ee qaramada midoobay (UNHCR)waxa ay siineysaa warqada ogolaashaha guurka (nulla-osta-per matrimonio) dadkii qaxootinimada loogu ogolaaday sharciga gineefa ee soo baxay 1951. |
| **Anigu waxaan xaq u leeyahay in aan helo ogolaasho ay famil kaygu iigu imaan karaan si eey iila noo laadaan.** | Hadii aad haysato sharciga asilo politico oo laguu aqoonsaday in aad qaxooti tahay ama aad haysato sharciga bini aadan nimada |

| | |
|---|---|
| | waxaad xaq u leedahay in ay kuu yimaadaan familkaaga oo ay kula noonaadaan . |
| **Uma baahnid inaad warqad u qorto qoraaga** | Dhaarta turjubaanku wuxuu ku siinayaa tarjumaad isla qiime la mid ah dukumiinti la turjumay |
| Anigu xaq waxaan u leeyahay in aan qaato dhalashada talyaaniga | Hadii aad tahay qaxooti ama haysta sharciga qaxootinimada (asilo politico)oo aad heysato shansano 5-sano oo xiriir ah degenaasho waxaad qaadan kartaa dhalashada talyaaniga |

SHAQADEYDA

| | |
|---|---|
| anigu waxaan xaq u lee yahay in la' ii aqoonsado shahaadooyinkeyga wax barasho | Qofka sharciga qaxootiga haysta\asilo-politico ama sida protezione-sussidaria sharciga talyaanigu wuxuu u ogolaanayaa in uu u aqoon sado shahaadooyinkooda waxbarasho xataa hadey ka maqantahay \oo aysan wadanin shahaadadooda\cadeyntooda wax barasho amaba wax koobi ah ka heynin. |
| anigu xaq wxaan u leeyahay in aan furto meherad ama shaqo cusub | Hadii aad rabto in aad ka shaqeyso shaqada wax soo saarka sida :ganacsiga,farsamada ama beeraha waa in aad isku qorto oo lagaa diiwaan geliyo ragistarka xirfadahaan ku saabsan ee kamera di komersho. |
| Anigu waxaan xaq u leeyahay in aan ka mid noqdo shirkad\iskaashato dad la shirkoobo. | Waxaadna shirkada ka mid noqon kartaa ilaa bilow geeda \ama asaaskeeda ama waxaad ku biiri kartaa marka la' sameeyo kadina qeyb ku yeelanaya dhaqaa leheeda. |
| Anigu waxaan xaq u leeyahay in aan qof wakiisho | Waxaadna ku wakiilan kartaa nootaayaha hortiisa adigoo qoraya cadeyn inuu qof kaasi wakiil kaa yahay kaagana yahay hal arin\ama shey,laba,sadex i.w.m.ama waxwalba inuu wakiil kaaga yahay kuna matalo adiga oo uu kuu qabanayo wixii aad adigu qaban lahayd xataa wadanka dibadiisa. |

**° anigu xaq waxaan u leeyahay in aan xaqiijiyo masawir ama warqad aqoonsi (dukuminti)**

Waxyaabaha la xiriira fulinta  arimaha xafiisyada waxaa sharcigu dhigayaa in la xaqiijiyo masawirkaaga in uu runtii masawikaaga yahay (tusaale ahaan warqada dhalashada oo masawirkaaga iyo magacaagaba ku yaalaan);markaanookale waxaad aadi kartaa adiga naftaada adigoo sita warqadaada aqoonsiga oo aan dhicin iyo masawirkaaga (carta di identità permesso soggiorno).xafiiska layiraa nootaayo ama kumuunaha:markaas nootayaha ama qofka ofishalka ah ee kumuunuhu u magacaabay howshaan waxa ay isku xirayaan oo is waafajinayaan masawirka iyo warqad qoran oo cadeyn ah ayagoo ku cadeynayain masawirku uu yahay wajigaaga oo la raacinayo kuli macluumaadkaaga sida magacaaga,goortaad dhalatay I.W.M.

Waxaa jira mararka qaar in lagaaga baahdo oo lagu yiraahdio noo keen  shahaadadaan koobigeeda oo la soo xaqiijiyay ama aqoonsikataba ha ahaadee sida warqada aqoon siga, ama warqad dhaqtar soo qoray. IWM.

**Hadiiaad u baahato koobi xaqiijisan una eg qaabka orginaalka dukumintigaas sida shahaadada dugsiga sare ama tan jaamacada i.w.m**. Balse shahaadadaas ama dukumintigaas uu italiya ka soo baxay waxaad ka doonaneysaa iskoolkii ama jaamacadii aad wax ka baratay;hadii aad ubaahato warqada cadeynesa in aad xaas tahay iyo in kale waxaad kala xiriireysaa kumuunaha aad degaanka ku tahay;hadii ay tahay warqad  nootayo uu  qorayna waxaad ka raadineysaa nootaayihii qoray.

**Hadii aad wadato warqada aqoonsiga oo orjinal ah ama koobigeeda mararka qaar waxaa kugu filan  dukumintigaad** wadato koobigiisa oo la xaqiijiyay:markas waxaad u geynesaa nootayaha, maxkamada ama kumuunaha waadna weydiisaneysa in koobigu uu la midyahay macnaha u egyahay dukumintigaaga orjinalka ah oo aad tusisay.**waxaa tan lamida hadii xataa aad haysato dukuminti ama warqado aqoonsi,shahaadooyin orjinaal ama koobi kana soo baxay ama laga qaatay dalkaaga** .

Hadii masawirka la xaqiijiyay iyo koobiga dukumintiga ay noqoto inloo isticmaalaayo wadanka dibediisa iya doo la eegayo hadba wadanka lala tagi doono waxaa muhiim ah in la sharciyeeyo ama shaabad looga soo saaro prefettura ama maxkamada wadanka waana in ay u  cadaato in xaqiijinta masawirka iyokoobiga dukumintigaba ay xaqiijisay qof ufishaal ah oo loo xil saaray arinkaan.

## °anigu xaq waxaan u leeyahay in aan iska diiwaan geliyo ragistarka tira koobka degmada aan deganahay ama ku noolahay/kumuunaha.

### anigu xaq waxaan u leeyahay in aan iska diiwaan geliyo ragistarka tira koobka degmada aan deganahay ama ku noolahay/kumuunaha.

Hadii aad heysato sharci (permesso di soggiorno)w waxaad xaq u leedahay in aad iska diiwaan geliso rajistarka tira koobka degmada aad degan tahay ama sida caadiga ah ugu nooshahaykadib markii lagu diiwaan geliyo waxaad qaadan kartaa teseraha aqonsiga (carta di identità)

waxaad kale oo aaad xaq u yeelaneysaa in lagaa caawiyo waxyaabaha qaar sida nolosha bulshada iyo caafimaadka iskana diiwaan gelin kartaa sistemka cafimaadka wadanka,waxaad weydiisan kartaa guri kaasa – balbalaare,waxaad geli kartaa imtixaanka kuu ogolaanayo in aad baabuur wadi karto oo waxaad qaadaneysaa hadii aad ku gudubto (batantaha),waxaad kale oo aad badalan kartaa hadii aad batante horay uga soo qaadatay wadankaaga waxaana laguugu badalayaa midka talyaaniga.

In aad iska diiwaan geliso rajistarka degmada aad ku nooshahay waxeey ka mid tahay waxyaabaha lagaa rabo marka aad weydiisaneysid dhalashada talyaaniga.

Si aad isaga diiwaan galisana waa in aad codsi u qorataa xafiiska diiwaan galinta degmadaada adigoo tusinaaya sharcigaaga (permesso di soggiorno ),ama warqadii aad ku cusboosiisaneysay.

Hadii aad qaxooti tahay (asilo-politico )ama aad heysato sharciga bini aadanimada oo uusan sharcigaagu dhicin waxaad iska diiwaangalin kartaa xafiiska tita koobka dadka ee degmadaada xataa hadii aadan heysan baasaboor.

Waxaadna weydiisan kartaa in lagula diiwaan geliyo reerkaaga sida ninkaaga ,naagtaada,caruurtaada,waalidka ama sodohyaashaada ama cid kasta oo kula nool waxaana ku filan in la cadeeyo dadka kula nool sharcigaaga (permesso di soggiorno ).

in lagu diiwaan geliyo wexeey qaadaneysaa laba maalmood (2) degenaashahaaguna wuxuu ka bilaabanayaa maalintii lagu diiwaan geliyo,hadii aadan afartan iyo shan casho gudahood ka helin wax war ah oo aysan wax kale dib kuu soo weydiisan xafiiska diiwaan gelintu sidaas ayaa laguugu qoray oo aad ku diiwaan gashan tahay.

Meesha aad ka diiwaan gashantahay waa meesha aad si joogto ah ugu nooshahay mana aha macneheeda in guriga aad ku nooshahay uu leeyahay qaab ama weynin la cayimay.

Waxaad weydiisan kartaa degenaasho xataa hadii aad marti u tahay qof saaxiib kaa ah,qaraabadaada ama qofka aad u shaqeyso.

Hadii aad ku nooshahay kaam ama (centro di accoglienza )waxaad xaq u leedahay in aad isku diiwaan geliso cinwaankooda iskana diiwaan galiso degmadaas kaamku ku yaalo.

Hadii eysan jirin meel aad degen tahay oo aad seexato jidka ama meeha ay tareenada ama basaska ku dhamaadaan (stazione)waxaad iska diiwaan gelin kartaa degmada laga xukumo rugtaas ama jidkaas aad seexato hadii aad cadeyso in bartaas lagaa helo mar walba oo ay guri camal kuu tahay.

Waxaana laguu diiwaan galinayaa sida qof aan meel uu ku hoydo heysan.(senzafissa di mora).

Xasuusnoow in aad iska diiwaan geliso halka aad ku nooshahay sida caadiga ah.

**°Anigu waxaan xaq u leeyahay in aan weydiisto/helo warqad ogolaasho ah oo ii saamaxaysa in aanguursado\guursan karo**

Anigu waxaan xaq u leeyahay in aan weydiisto/helo warqad ogolaasho ah oo ii saamaxaysa in aanguursado\guursan karo.

Qof ajnabi ah oo raba in uu ku guursado italiya waa in uu layimaadaa ,keenaa ,ugeeyaa warqad cadeyneysa in uu guursan karo oo aysan jirin wax ka hor istaagaya in uu guursadowuxuuna u geynayaa cadeyntaas ufishalka\qofka uxilsaaran arimaha shacbiga qeybta guurka demadiisakumuunaha uu degantahay. cadeyntaas waa in ay kasoo baxday maxkamada wadankiisa ama xafiiska u qaabilsan arimahan in uu cadeeyo.

Si kastaba ha ahaatee, kuwa loo aqoonsaday inay yihiin qaxooti ku sugan Talyaaniga, ma la xiriiri karaan maamulkooda

Dalka asal ahaan. Haddaba Wasaaradda Arrimaha Gudaha (Waaxda Arrimaha Gudaha iyo Dhulka) oo leh

wareegtada lambar 1 ee Janaayo 12, 2022 waxaa lagu sharxay in dadka haysta aqoonsiga qaxootinimo, laga aqoonsan yahay Talyaaniga sida waafaqsan

Heshiiskii Geneva ee 28kii Luulyo 1951, wuxuu codsan karaa Diiwaangelinta Madaniga ah ee Degmada deganaanshaha, ama meesha aad rabto in aad guursato, daabacaadda arooska adigoo soo bandhigaya, tixraac

ilaa heerkaaga guur, kaliya is-sheegid sida waafaqsan Xeer Madaxweyne Lr. 445/2000, la xaqiijiyay

diiwaan-hayaha madaniga ah, oo cidda danaynaysa ay ku caddaynayso, iyada oo mas'uuliyadda saaran tahay, meeqaamkeeda

bilaasha. Bayaankan waxaa lagu samayn karaa iyadoo la buuxinayo foomamka laga heli karo xafiisyada degmooyinka. Habkani waxa uu khuseeyaa oo keliya dadka haysta darajada

qaxootinimo.

hadii aad tahay qaxooti ama aad heysato sharciga bini qaran ( tusaale gaar ah) ama sharciga susiidiyaha loo yaqaano ee aadan kareyn ama aadan rabin in aad weydiisato xukuumada wadan kaad u dhalatay waad weydiisan kartaa ufishaalka/ama qofka u xil saaran degmada/kumuunaha qeybta guurka in uu soo bandhigo maalinta/taariiqda iyo saacada aadguursaneyso adigoo u geynaaya cadeyn ay soo saxiixday maxkamada ama aad ku hor cadeysay kuna sixiixday nootaayaha hortiisa.sidii aan horayba ugu cadeynay kor fiiri xarafka (A).

waana in aad qoraal ku cadeyso sababta aadan uga keeni karin xukuumada wadankaad u dhalatay cadeynta ama ogolaashah guurka.

ufishaalka qeybta guurka/ama qofka u xil saaran soo ban dhigida taariiqda guurkaaga hadii uu kuu ogolaan waayo waxaadabiil ka qaadan kartaa maxkamada adigoo weydiisanaya xaakimka in uu xaqiijiyo,baaro ee cadeeyo inaaney jirin wax kaa hor istaagaya guur sigaas in aaney jirin amarna ku siiyo in ufishalka qeybta guurka uu soo bandhigo maalinta,taariiqda iyo saacda uu guurku ka dhici doono degmada/kumuunaha.

**°Anigu waxaan xaq u leeyahay in aan helo ogolaasho ay famil kaygu iigu imaan karaan si eey iila noo laadaan.**

Hadii aad haysato sharciga asilo politico oo laguu aqoonsaday in aad qaxooti tahay ama aad haysato sharciga bini aadan nimada waxaad xaq u leedahay in ay kuu yimaadaan familkaaga oo ay kula noonaadaan sida ninkaaga oo qaan gaar ah aadna wali is qabtaan oo aydin is furin,ilmahaaga oo aan qaan gaarin ama aan guursan,waalidkaa ama sodoh yaashaada ,ilmahaaga hadii aadan xataa guur ku dhalin,caruur aad korsatay waalidkoodna hadii ay nool yihiin ay raali kaaga yihiin,ilmo aad dhashay xataa hadii ay qaan gaar yihiin laakiin ay naafo yihiin sida xaga maskaxda\caqliga ama laxaadka sida (lugaha, gacmaha,indhaha i.w.m).

waalidkaa hadii aad adigu ma'suul ka tahay oo aysan ilmo kale qabin ama waalidkaa jiro in kabadan 65-sano oo aysan walaalahaa u suuroobeynin in ay xanaaaneeyaan.

Hadaad hesato sharciga qaxootiga (asilo-politico) ama kan bini aadan nimada lagu weydiin maayo oo lagugu xiri maayo in aad cadeyso lacagta ku soo gasho\dhaqaalahaaga ama guriga aad degan tahay qaab kiisa sida cabirkiisa\weyninkiisa i.w.m.waayo waad ka duwantahay ajnabiga kale ee aan haysan sharciga qaxootiga ama asilo-politico.

Sidoo kale hadii sharcigaagu qaxooti yahay ama bini aadan nimada oo aadan hayninwax cadeynaaya in dad ka aad rabto in ay yihiin reerkaaga\familkaaga amaba wax yaabo kale oo ku xinan in ay reerkaaga yihiin\familkaaga mararar kaan oo kale waxaa ku caawini kara nootaayaha asagoo kuu sameynaaya cadeyn u dhiganta oo bedeleysa cadeynta orjinalka \ufishaalka ah.

**°waxaan xaq u leeyahay in la'ii turjumo\dukumiinti\cadeyn i.w.m**

i.w.m sida shahaado iskool ama jaamacadeed ayadoo loo badalayo luquda wadanka aan joogo ama luqada aan markaa rabo iyada oo qofka turjumaya uu ku dhaaranayo maxkamada hordeeda in turjumaadiisu ay ka run sheegeyso iskuna mid yihiin axa uu qorayo iyo waxa ku qoran dukumiintiga\cadenta orjinaalka ah.

Sidoo kale waxaa la mida:

A)marka dukumiinti\aqoonsi ama cadeyn ka soo baxday wadanka talyaaniga kuna qoran luqada talyaaniga la rabo in loo badalo oo lagu qoro luqad kale laakiin dukumiintiga\aqoonsiga ama cadeyntaas loo isticmaalaayo italiya gudeheeda.

B)marka dukumiinti\aqoonsi ama cadeyn ka soo baxday wadanka talyaaniga kuna qoran luqada talyaaniga la rabo in loo badalo oo lagu qoro luqad kale laakiin dukumiintiga\aqoonsiga ama cadeyntaas loo isticmaalaayo luqadaas loo badaley wadankeeda.

C)marka dukuminti\aqoonsi\cadeyn ka soo baxday ama ka soo baxday wadan kale kuna qoran luqada wadan kaas loo badalayo laguna qorayo luqada talyaaniga laguna isticmaalayo itaaliya dhexdeeda.

Qofka turjumaha ah wuxuu ku dhaaranayaa ama ku hor dhaaran karaa maxkamada xaakimka hortiisa,xaakimka nabada,ama nootayah hortiisa.

Turjumuhu waa in uusan dan qaas ah ka lahayn waxa uu turjumayo waana in aaney faa'iido ama qassaro ka soo gaareyn .qasabna ma'aha in turjumuhu uu ka diiwaan gashan yahay rajiistarka turjubaanada maxkamada.

Marka la rabo in dukumintiga\cadeynta la turjumay in loo istic maalo wadan ka duwan wadankii uu ka soo baxday dukumintigaas\cadeyntaas waa in laga soo shrciyeeyaa maxkamada ama prefatturada ayadoo shaabad saareysa in la soo sharciyeeyana wexey cadeyneysaa in turjumuhu uu ka hor dhaartay maxkamada horteeda qof ufishal ah oo maxkamadu g'aamisay una xil saartay arin kaan.

## Anigu xaq waxaan u leeyahay in aan qaato dhalashada talyaaniga

Hadii aad tahay qaxooti ama haysta sharciga qaxootinimada (asilo politico)oo aad heysato shansano 5-sano oo xiriir ah degenaasho waxaad qaadan kartaa dhalashada talyaaniga waxaadna ku qaadaneysaa qodob la yiraahdo (naturalizzazione)macneheeduna yahay in aad caadi uga mid noqotay dadka wadanka u dhashay.

Sharciyada kale oo dhan sida bini aadan nimada ,shaqaalaha ama ardayda waxaalooga bahan yahay toban sano oodegenaasho xiriir ah in ay heystaan si ay dhalashada talyaaniga ku qaataan.

Habka lagu qaato dhalashada: waain aad codsi geysataa \ u qorataa prefetturada meesha aad degentahay ku taala ama ka tirsan.

Codsigu waxa uu ka kooban yahay hal warqad oo aad ku cadeyneysid macluumaad kaaga oo dhan sida magacaaga oo sadexan,taariiqda aad dhalatay,meeshaad ku dhalatay iyo sanadkaad dhalatay iyo sidoo kale macluumaadka waalidkaa iyo cadeyn xaqiijinesa in aadan dembi galin , in aad dhaqanka iyo hidaha talyaaniga aad dhex gashay oo aad la qabsatay in kugu filan iyo in familkaaga\reerkiina dhaqaale ahaan isku filan yihiin.

Sidoo kale hadii aad qaxooti tahay (asilo-politico) oo dukumiintiyada lagaaga baahan yahay sida warqada dhalashada iyo in aadan denbi galin aadan ka soo cadeyn karin safaaradaada waxaad ka hor cadeyn kartaa nootaayo asagaana xaqiijinaya wixii aad hortiisa ka qirato,waxaakale oo aad ka cadeyn kartaa kumuunaha aad degan tahay ama maxkamada.

Dib u eegista kiiskaaga waa in lagu dhammeeyaa 24 bilood gudahood, oo la kordhin karo ugu badnaan 36

bilo, laakiin codsigu wuu sii jiraa xitaa haddii wakhtiga kama dambaysta ah la dhaafo.

Waxaana dhalashada talyaaniga lagugu siinayaa sharci uu go'aamiyay madax weynaha dowlada talyaaniga.

Kadibna waxaad u dhaaraneysaa in aad daacad u tahay una ahaan doonto wadanka talyaaniga iyo dastuurkiisa iyo shuruucdiisa.

Waxaadna ka hor dhaaraneysaa duqamagaalada ad degentahay (sindikaha).

<u>Xasuus noow hadii ay jirto meel aad si caadi ah ugu nooshahay ama aad seexato ineey waajib kugu tahay in aad iska diiwaangeliso xafiiska tirakoobka degmadaas aad ku sugantahay.</u>

## °anigu waxaan xaq u lee yahay in la' ii aqoonsado shahaadooyinkeyga wax barasho

sida caadiga ah  dadka ajnabiga ah ee raba in ay shahaadooyin kooda wax barasho looga aqoon sado italiya waa in ay ka keenaan cadeyn qiimeyneysa shahaadadaas kana keenaan wadankooda  ayadoo ku qoran luqada talyaaniga lana soo marsiiyo safaarada ama qunsuliyqda talyaaniga u joogta wadankaas.taasoo lagu cadeynaayo waxa ay ku saab san tahay shahaadadaas ama waxa uu soo bartay qofkaas ay ku cadahay,qiimaha ay ka leedahay wadankiisa waxa lagu xiray ama looga baahaday in uu isku qoro iskoolkaas ama jaamacadaas si uu u qaato shahaadadaan,intii ay  qaadaneyso\sanad, laba ama sasex...inta loogu tala galay in lagu qaato sha haadadaan.

Sharciga talyaaniga wuxuu dhgayaa in qofka heysta sharciga qaxootiga ama kan bini aadan nimada loo raacayo qenuunka qofka talyaaniga ah loo raacayo laguna qiimeynayo  marka uu wato\heysto shahaado wax barasho ama cadeyn ,ama aqoon kororsi uu ka soo qaatay\uga soo baxay wadanka dibediisa.

Qofka sharciga qaxootiga haysta\asilo-politico ama umanitariyaha  sida badan ma' wataan  shahaadooyin koodii wax barasho am cadeyn sheegeysa wixii ay soo barteen waayoo wax xiriir ah lama laha  wadankii ay u dhasheen markan oo kale sharciga talyaanigu wuxuu u ogolaanayaa in uu u aqoon sado waxbarashadooda xataa hadey ka maqantahay \oo aysan wadanin shahaadadooda\cadeyntooda wax barasho.

Sidoo kale hadii aad heysato sharciga qaxootiga \asilo-politico ama kan bini aadan nimada ee aad dooneyso in shahaadadaada jaamacadeed italiya lagaaga aqoonsado waxaa kugu filan in aad heysato sharci cadeynaya in aad qaxooti tahay ama kan bini aadan nimada aadna qorto cadeyn sheegeysa oo qeexeysa \sharxeysa shahaadadaada wax barasho\waxaad soo baratay,sanadkaad ka soo baxday jaamacada,wadanka ay ku taalo jaamacadaas aad ka soo baxday,jadwalkii xisadihii aad soo qaadatay\cutubyadii maadooyinka iyo saacadihii aad soo qaadatay,imtixaanadii aad ku gudubtay iyo buuntooyin kaad ku gudubtay\qaadatay\natiijadii.

Hadii aad qaxooti tahay ama aad heysato sharciga loo yaqaano (protezione – sussidiaria),oo aad tahay arday jaamacadeed oo aan wali qalin jabin oo aad rabto in aad waxbarashadaada jaamacadaha italiya ka sii wadato

waa in aad  qoraal ku cadeysaa qeybta jaamacada aad dhiganeysay\waxa ay ku saab saned sida jaamacada dhaqaalaha, sanadkaad ku qoreyd ama aad mareysay sida fasalka\sanadka labaad,imtixaanadii aad soo dhiibtay\ku soo gudubtay iyo buuntooyn koodii\natiijooyin koodii waxaana qoraalkaan aad ku cadeyneso waxii aad baraneysay luqada talyaaniga lagu yiraah daa (dichiarazione-sostitutiva di certificazione) waxaadna ka hor xaqiijineysaa kana sixiixeysaa kumunaha\degmada ama nootaayaha hortiisa.

Hadii aad qaxooti tahay ama aad heysato sharciga loo yaqaano (protezione – sussidiaria),oo aad heysato shahaadada dugsiga sare oo aad rabto\dooneyso in aad jaamacad isaga qorto\ ka dhigato wadanka talyaaniga

waa in aad xaqiijisaa \cadeysaa iskoolkii aad ka soo qaadatay shahaadada\ka so baxday maadadii\wixii aad ku soo baratay iskoolka sida iskoolka farsamada ama caafimaadka i.w.m,waxaadna sidii aan hore ugu soo sheegnay ka xaqiijinesaa\cadeynesaa kumunaha\degmada ama nootaayaha hortiisa adigoo sixiixaya luqada talyaanigana waxaa lagu yiraah daa(dichiarazione-sostitutiva di certificazione ).hadaba sharcigu wuxuu dhigayaa in jaamacad kasta ama iskoolada wax laga bartoo dhan ay u madax banaan  yihiin habka\ama sida ay u qiimeeyaan ama ku aqoonsadaan kuna hir galiyaaan\ama ku aqbalaan ama isula barbar dhigaan

kuwooda shahaadada iskoolkooda \iskoolkaan\jamacadooda\jamacadaan shahaadooyin ka wax  barasho ee wadanka dibediisa laga soo qaato\looga soo baxo.

**°anigu xaq wxaan u leeyahay in aan furto meherad ama shaqo cusub**

Hadii aad rabto in aad ka shaqeyso shaqada wax soo saarka sida :ganacsiga,farsamada ama beeraha kalidaa adiga oo aan cidna la shirkoobin waxaad noqon kartaa iskiis u shaqeyste: waxaadna tahay qofka kaligii xukuma shaqadaas. Balse waxaad heli kartaa shaqaale kuu shaqeeya iyo kuwo kula shaqeeya adiga iyo familkaagaba. Mana loo baahna haba yaraatee wax lacaga in aad ku bilowdo meheradaan ama shaqadaan cusub oo aad abuureyso.

waxaa lagaaga baahan yahay warqadaada aqoonsiga oo aan dhicin iyo koodishe fiskaalahaaga iyo in aad furato\ weydiisato partita IVA all'agenzia della entrate iyo in aad isku qorto oo lagaa diiwaan geliyo ragistarka xirfadahaan ku saabsan ee kamera di komersho kuna yaala magaalada aad degantaha,waxaana lagaa rabaa in aad dhiibto canshuurta sanadka oo laga qaado dadka ka diiwaan gashan rajistarkan.

Waxaadna ka heli kartaa wixii faah faahin ah cinwaankaan .www.dirittoannuale.it/cada-new/IT/dira-int.htm. Xirfadaha ama shaqooyinka qaarkood waxay u baahan yihiin in ogolaasho laga helo kumuunaha ama wasaarada caafimaadka ama laanta caafimadka (AsL). Waxadna faah faahin ka heli kartaa SUAP (sportello unico delle attività produttive) oo ku dhex taala kaamera di komersho kaa soo aad ogeysiineysid marka aad bilaabeysid xirfadaada ama shaqadaada ama ganacsi II.W.M.

Hadii aad rabto in aad ogaato intaa in ka badan waxaad ka heleysaa cinwaankaan www.impresainungiorno.gov.it/web/I-impresa-e-il-comune/scia-contestuali-a-comunica.

Marka aad xirfad,meherad ama aad ikaa u shaqeysaneyso waa in aad canshuur u shubtaa meeshalagu magacaabo INPS si aad u qaadato mushaar markii aad shaqada joojisid ama ka fariisatid (gabow dartii) waxaa kale oo aad canshuur u shubeysaa INAIL oo qaabilsan ceymiska dadka kula shaqeeya lacala hadii shaqada dhexdeeda dhibaatooyin ku soo gaaraan.

Waxaan oo dhan waxaad ku furan kartaa internetka dhexdiisa adigoo ku sameyndoona islamarkaas oo kaliya in aad iska diiwaan geliso rajiistarka xirfadaha (registro delle imprese.

Wixii faah faahin ah waxaad ka heleysaa cinwaankaan :www.starwb.infocamere.it/idex.isp

**°anigu waxaan xaq u leeyahay in aan ka mid noqdo shirkad\iskaashato dad la shirkoobo.**

Hadii ay dhowr qof rabaan in eey si wada jir ah u abuurtaan shaqo\ meherad\xirfad ama u sameys taan ama u wada shaqeystaan ama eey ku biiraan dad kale oo ayagu horay u heystay meherad\shaqo\xirfad-shirkad ah hadii ay heys taan sharci (permesso di soggiorno) Haysashada dhammaan shuruudaha sharcigu qeexayo - iyadoo lagu saleynayo hubinta ay sameeyeen.

nootaayo qorista warbixinta oo xidhan waxaad xaq u leeda hay ama xaq u leedihiin in aad ka mid noqo taan shirkadaas\ikaahigaas.

Si aad shirkad u samaysato ama aad uga mid noqoto, waxaad u baahan tahay warqadda iyo talada nootaayo, kaasoo ku siin doona.

dhammaan macluumaadka si loo sameeyo doorashada ugu saxsan, si waafaqsan sharciga.

Waxaadna shirkada ka mid noqon kartaa ilaa bilow geeda \ama asaaskeeda ama waxaad ku biiri kartaa marka la' sameeyo kadina qeyb ku yeelanaya dhaqaa leheeda.

**°Anigu waxaan xaq u leeyahay in aan qof wakiisho**

Hadii aad rabto in aad guri iska gado ama aad guursato waxaad u wakiilan kartaa sida sharcigu dhigayo qof kale oo adiga ku matalaya isagoo kuu fulinaya\ qabanaya arinka ama arimaha aad u xil saarato asagoo u fulinaya  sida adiga dantaada ku jirto ama sida aad u amarto\u xil saarato waxa ayna la midtahay wixii uu sameeyo oo  ku saab san arinka aad u xil saaratay  in aad adigu sameysay. waxaana afka talyaaniga lagu yiraah daa qofkaas wakiilka noqonaaya (procuratore)ama (delega).
 Waxaadna ku wakiilan kartaa adigoo qoraya cadeyn inuu qof kaasi wakiil kaa yahay kaagana yahay hal arin\ama shey,laba,sadex  i.w.m.ama waxwalba inuu wakiil kaaga yahay.

In aad wakiilato qof kale waxaad kala xiriiri kartaa nootaayo adigoo tusaya ama wata sharcigaaga\aqoonsigaaga oo aan dhicin iyo macluumaadka qofka aad wakiilaneyso sida magaciisa oo sadexan tariiqduu dhashay iyo meesha uu ku dhashay i.w.m. Iyo qofka aad wakiilatay waxa uu kaaga wakiil noqonayo.

Saxiixa qofka kaama hor istaagayo  si kastaba in aad aad  wakiilato oo aad magacawdo qofkaas wakiilka kuu noqonaya waayo asaga ama adiga ayaa qoraya warqada aad ugu dooraneyso in uu wakiil kaa noqdo.

Hadii wakaaladaas nootaayuhu cadeeyay ama ku qoray luqada talyaaniga ee la rabo in wadanka dibediisa loo istic maalo waa in laga sharciyeeyaa xaga maxkamada ama prefetturada ayadoo ku dhufaneysa shaabad. nootaayahana koobi laga dhigo.

Marka laga sharciyeynayo maxkamada ama prefatturada waa in ay cadahay ama muuqataa in cadeynta qofka wakiilka noqonaaya ay ka soo baxday oo lagu hor saxiixay qof ufishaal ah hortiisa oo u xil saaran arinkaan sida nootaayaha.